



Isbitaalka Children's Minnesota

Soo-gelidda Ballanta Fiidiyowga

Waxaad ku mahadsan tahay in aad isticmaaleysa ballanta fiidiyowga ee daryeelka ilmahaaga. Macluumaadka soo socda waa sida loo raacayo shuruudaha qalabka ee loo isticmaalayo ballamaha fiidiyowga oo ah wax nagu cusub. Sida waalidka oo kale, waxa uu isbitaalku rabo waa in ay ilmuu u koraan sida ugu fiican, oo leh farxad iyo caafimaad.

Hadda bilow


Ballamaha fiidiyowga ee kilinigga waa in laga soo galo kadinka intarnetka MyChildren's <https://www.childrensmn.org/mychildrens/>.

Haddii aadan hadda ku qorneyn kadinka intarnetka MyChildren's, waxaa kugu qori kar miiska diiwaangelinta bukaanka ee kilinigga ama soo garaac 612-813-6216. Bukaanka da' ahaan ka yar 18 waa in ay codsigooda MyChildren's soo gudbiyaan waalid/masuul sharchiyeysan.

Ka hor intaan la gaarin ballan fiidiyowga

Si aad u hubsato sida aad u soo galeysa fiidiyowga, fadlan raac tilmaamaha soo socda. Fadlan ogow: waxaa jira dhown waxyaaoood oo aad isugu diyaarneyso ballanta fiidiyowga, wakhti kugu filan u hel waxa aad sameyn doonto ka hor intaan la gaarin ballantaada fiidiyowga.

1. Kadinka Intarnetka MyChildren's ka soo gal 10 ilaa 15 daqiqo ka hor intaan la gaarin ballanta: <https://www.childrensmn.org/mychildrens/>.
2. Haddii aad ka soo galeysa barnaamijka gelidda intarnetka ama taleefan, isticmaal nooca Chrome (haddii aad isticmaaleysa qalab ku shaqeeya Windows or Android), ama nooca Safari (haddii aad isticmaaleysa aalad ku shaqeysa Mac ama iOS).
3. Marka aad soo gasho MyChildren's, guji **Appointments (Ballamaha)** si aad u aragto liiska ballamaha kuu yaalla, sida kuwa fiidiyowga. (eeg bogga dambe)



NAGALA SOO XIRIIR

Taageeridda xagga
farsamada:

Soo garaac 1-877-621-8014

Wixii su'aalo ku saabsan
ballantaada;

Fadlan taleefan kula xiriir
kilinigga

Children's
MINNESOTA

childrensmn.org/primarycare

My CHILDREN'S
Online access to your Children's Minnesota medical record

Spanish version available
To use the portal in Spanish, go to the Settings area found under your username. Choose "Espanol – Estados Unidos" under "Change Language."

Para usar el portal en español, inicie sesión
Para usar el portal en español, vaya a la pestaña Settings (Ajustes) que se encuentra debajo de su nombre de usuario. Seleccione la opción "Change Language" (Cambiar idioma) y elija "Español – Estados Unidos".

How to schedule COVID-19 vaccines for Children's Minnesota patients

- Children's Minnesota patients ages 12 years and older can schedule COVID-19 vaccinations at Children's Minnesota primary care clinics. [Click here to schedule an appointment.](#)
- You can schedule your child's well-child check-up for the same time! Well-child check-ups are recommended by Children's Minnesota to help keep your child healthy but not required to get covered to vaccinations.

- Sawir ah fiidiyow ayaa ku dheggen ballan kasta oo ah nooca fiidiyowga intarnetka.
- Haddii aad ballantaada fiidiyowga arki weydo, la xiriir kilinigga.

Appointments

Tuesday, Jul 27, 2021

Your video visit is ready to join.

Clinic-TeleHealth Future Video

10:20 a.m. CDT
For Patient#15 Healthlife15
with Fate, Bryan H
612-813-6107

[View Instructions](#)

[Join Now](#) [Options](#)

3. Tijaabi kambuyutarka, xalleefka ama taleefanka si aad u xaqijiso meelaha laga maareeyo siday u shaqeynayaan codka iyo fiidiyowga.
- Waxaa jira talooyin kugu hoggaamin kara wixii cillad-bixin ah, haddaad rabto.
- La soo deg oo gasho aaladda wixii cusub ee barnaamiju u baahdo.

Test My Device


On the following screens, we'll check your camera, microphone and speakers to prepare you for your visit.

Enter your name


[Test My Connection](#)

© 2021 American Well. Amwell is a registered trademark of American Well Corporation.
Support Terms Privacy

- Marka aad dhammeysa Hubinta Qalabka, **qor taleefan lagaala soo xiriiri karo**. Dabadeedna guji **Continue (Soco)**.
- Waxaad soo galeysaa Qeypta Sugidda Fiidiyowga. Shaqaalaha ayaa kuu sheegaya in aad soo gashay.




- Waxaad **dooran kartaa English ama Somali** adigoo ka dhex dooranaya liiska ka muuqda dhinaca midige ee shaashadda.



- Waxaad arki kartaa ogeysiis lagugu weydiinayo in aad **grant your browser access (barnaamijka u oggolaato)** makarafoonka iyo kaamaradda. Waa khasab in aad u oggolaato si aad u isticmaasho makarafoonka iyo kaamaradda inta lagu jiro ballanta fiidiyowga.

Inta lagu jiro ballantaada fiidiyowga intarnetka

- Marka ay shaqaalaha caafimaadka kuu bilaabaan ballantaada, waxaa kuu oo dhici doona Taleefanka Bilaabidda. Guji **Accept (Waayahay)** si aad u gasho ballanta fiidiyowga.




- Markaad waayahay uga jawaabto taleefanka, ballanta ayaa bilaabaneysa.

- Waxaad arki doontaa shaqaalaha caafimaadka oo ku jira fiidiyowga si ay kuugu bilaabaan ballanta fiidiyowga ilmaha. Waa ay ku arki doonaan waana ku maqlayaan.

Haddii aad rabto in ay xubno kale oo qoyska ka mid ah in ay kula soo galaan ballanta fiidiyowga, boostadooda intarnetka ama si farriin taleefan soo dir si ay shaqaaluhu ugu casumaan ka dib marka aad soo gashaan ballantaada fiidiyowga.

6. Markay idin dhammaato ballanta fiidiyowga, guji battoonka **End Call (Ka Bax)**.

- Haddii aad rabto in aad dib u gasho ballanta fiidiyowga ka dib markaad gujiso **End Call (Ka Bax)**, guji **Join Session (Ku Noqo)** si aad u gasho fiidiyowgii ballanta. Batoonka **Join Session (Gal Ballantaada)** waa kuu diyaar haddii uusan wakhtigii kaa dhicin oo uusan dhakhtarku dhinaciisa ka joojin batoonka ballanta.



Ka warraan haddii uusan shaqeeynyn kadinka intarnetka?

Akhriso tilmaamaha u qoran habka PDF.